


# Istratejiyada carruurta

Lapsistrategia • Barnstrategin
Child Strategy

## AYAY KU SOCOTAA ISTRATEEJIYADANI?

Dhammaan carruurta da'aha kala duwan ah.

Adiga ayay kugu socotaa oo caawimaad u baahan.

Adiga ayay kugu socotaa oo faraxsan.

Adiga ayay kugu socotaa oo saaxiib wanaagsan dadka kale u ah.

Adiga ayay kugu socotaa oo u baahan saaxiib.

Adiga ayay kugu socotaa oo wakhti wakhtiyada ka mid ah carruur soo ahaa.

Adiga ayay kugu socotaa oo mar noqon doona qof qaan gaadh.

# Istratejiyad qarameedka carruurta ee Finland

LAPSI-strategia

Diyaarinta istratejiyadda dowladda ee carruurtu waxaay bilaabatay xukuumadii raa'izal wasaaraha Juha Sipilä, waxaayna ku bilaabatay shaqada Lapsen aika 2040- la yidhaahdo. Shaqadaasi waxaay ku sii socotay barlamankii raai'zal wasaaraha Sanna Marin iyada oo komishanka iyo shaqo sarkaal ahaan loogaga shaqaynay. Komishanka istratejiyada dowladda ee carruurta ayaa aqbalay istratejiyadan iyada oo qayb ka ah shirkoodii rogrogidda ee dhacay bishii Diisambar e 2020 (Taxanaha bandhigga ee dowladda 2021:8). Komishanka cidda ku jirtay, mowduuca shirka, waxyaabaha lagaga dhawaaqay shirka iyo istratejiyada waxyaabaha lagu dabaqay ee gaar loo soo saaray waxaa laga heli karaa iyaga oo la soo koobay ciwaankan: www.lapsistrategia.fi.

# Tusmada qoraalka

**7 SOO KOOBIDDA ISTRATEJIYADDA**

8 Habraacyada udub dhexaadka u ah istaraatijada

11 Aasaaska istratejiyadda ee mushtamaceed iyo ka sharciyeed

**14 DHAMAAN CARRUURTA OO DHAN FINLAND AY LEEYIHIIN**

16 Yoolka ah Finland tixgalinaysa xaquuqda carruurta

20 Ka hortaga takoorida iyo kalasaraynta

24 Carruuraha ku jira xaalada nuglaansha ha sugidda xuqooqdooda

29 Carruurta oo waxyeeladda laga badbaadiyo

**36 CARRUUR BADQABTA OO AQOON LEH**

38 Adeegyada caafimaadka- iyo arrimaha bulshada ee carruurta iyo qoyska

44 Barbaarin-horaadka iyo waxbarashada

51 In qoysku aay helaan dakhli ku filan iyo isku duwidda nolosha qoyska iyo ta shaqada

56 Xidhiidhada carruurta filkooda iyo dadka qaraabada u dhow ah

61 Xilliyada firaaqada ee carruurta iyo hiwaayadaha

**68 CARRUURTA OO KA QAYB QAADANAYA MUSHTAMACA**

70 Qiimeynta saameynta carruurta lagu yeesho iyo u dajinta miisaaniyada carruurta

74 Xuquuqda carruurta ee ah iyo in aay xog helaan

**78 HIRGALINTA ISTRATEEJIYADA**

80 Istaratejiyada iyo qorshaha hirgalinta



# Soo koobidda istratejiyadda



# Habraacyada udub dhexaadka u ah istaraatijada

Istaraatijiyada carruurtu waa mid abuuraysa in wadanka Finland noqdo mid ixtiraamaya xaquuqda ilmaha, isla markaana ka dhigaysa qoyska in dhinaca wanaagsan laga eego. Waxaa intaa dheer in la ilaaliyo xaquuqda ilmaha yadoo la raacayo hadafyada iyo hababka xaquuqda aadanaha ee qaramada midoobay u dajiyeen carruurta. Istaraatijiyada carruurta waddanka waxaa soo jeediyey marar badan xukuumado kala dambeeyey wakhtiyo kala duwan.

**Istaraatijada carruurta sababaha loogu baahanyahay waa kuwan:**

1. Go'aamada muhiimka ah ee laga gaadhayo xaquuqda carruurtu marar badan way kala daadsan yihiin lamana raaco hab-raacyada xaquuqul iisaanka ee wadanka Finland u yaala sidaasi darteed

2. Fulinta xaquuqda ilmaha waaqac ahaan waxay aad ugu xidhan  tahay halka uu kasoo jeedo, qoyskiisa iyo  xaaladaha kale ee ku xeersan ama gadaaman.

Istaraatjiyadan hadafka  udub u dhexaadka u ah waa abuurida  aas aaska waara ee siyaasada carruurta iyo qoyska yadoo la raacayo hab-raacyada. Istaraatijadan waxaa lagu horumarinaynaa go'aan qaadashada carruurta  khuseeya, wadashaqaynta iyo qaab hawleedka iyadoo dhamaan la tixgalinayo maamulka, daboolaya heerarka iyo hab-sami u socodka xuquuqaha aas aasiga ah ee dadka.

**Istiraatijadan waxaa aas aas u ah saddex fikir oo waa wayn:**

I. Istaraatijiyada carruurtu waa mid abuuraysa in wadanka Finland noqdo mid ixtiraamaya xaquuqda ilmaha, isla markaana ka dhigaysa qoyska in dhinaca wanaagsan laga eego.

II. Doorka iyo xaquuqda carruurta waa in lagu dhisaa qaab isku xidhan oo xaqiiqooyin ku sulaysan dhamaan arimaha siyaasada iyo hawlaha kale bulshadaba sida bulshada inteeda kaleba waa inay xaq u yeeshaan ogaanshaha xaquuqdooda.

III. Sugida heerka nuglaansho ee ilmaha ama carruurta si loo badbaadiyo isla markaana loo aqoonsado si wanaagsan baahiyahooda.

Heshiiska caalamiga ee qaramada midoobay qodobkiisa koobaa sida uu dhigayo heshiiska guud ilmo ama carruur waxaa loola jeedaa qofkasta oo ka yar 18 sano jir. Sharciyada dadka waa wayni ma qabanayaan marka laga reebo kuwa carruurta loogu talo galay mooyaane. Hadaba istaraatijadan waxay taabanaysaa dhamaan carruurta ka yar yar 18 sano jirka. Sidoo kale, waxay istaraatiijidan taabanaysaa dhamaan qoyska ilmuhu la nool yahay iyo wakhtiga kala guurka ah qaangaadhnimada iyo dhalinyaranimada cida xidhiidhka la leh.


# Aasaaska istratejiyadda ee mushtamaceed iyo ka sharciyeed

Heshiishka caalamiga ah ee qaramada midoobay (HeshiisS 59-60/1991) waxay Finland ku waajibanayaan xuquuqda dadka. Kaasi oo faraya in cida ka yar 18 sano jir xuquuqdooda la ilaaliyo heerarka noloshooda iyo doorarka kala duwan ee ay bulshada ay la leeyihiin.

Istaraatijiyada carruurtu waxay fulinaysaa heshiiska waajibaadka saaran Finland. Istaraatijiyada carruurtu waxay cuskanaysaa ama ku tiirsan tahay heshiishka qaramada midoobay ee ilaalinta xuquuqda carruurta iyo dhaxal adag ee dawlada Finland ee ilaalinta xuquuqda dadka.

Istaraatiijiyadu waxay ku salaysan tahay afarta mabaadii' ee guud ee heshiiska caalamiga ah ee xaquuqda carruurta kuwaasi oo kala ah: faquuq ama takoor la'aan, danta carruurta oo waxwalba laga horeysiiyo, badbaado ku noolaansho, horumarin iyo ka qayb gal bulsho.

**Aasaaska istratejiyadda ee mushtamaceed iyo ka sharciyeed:**



- La dagaalanka takooridda iyo sinnaan la'aanta dhinaca kooxaha carruurta
- Sugidda xuquuqda caruurta xaaladaha nugul ku nool
- In caruurta laga ilaaliyo waxyeelo oo dhan
- Baahiyada caruurta iyo qoysaska adeegyo bulsho iyo kuwo caafimaad oo lagu kaafiyo hirgalintooda
- Ka jawaabida baahiyaha ilmaha barbaarinta-curdinka ah iyo iskuulada ee shaqsi ahaaneed u qorsheyntooda
- In la hubiyo inay qoysaska carruurta lihi inaay helaan dakhli ku filan iyo amniga taakulaynta nolosha iyo iskuduwidda nolosha qoyska iyo shaqada.
- Taageeridda xidhiidhada caruurta qaraabadooda iyo filkooda
- Hirgalinta hiwaayadaha caruurta iyo waxqabadka kale ee xilliga firaaqada
- Danta ilmuhu in aay ahmiyadda koowaad leedahay in si joogto ah loo dabaqo lana qiimeeyo saameynta caruurta
- Horumarinta fursadaha saamaynta, ka qaybgalka iyo in caruurta la maqlo
- Agaasimidda rrimaha caruurta, istratejiyada caruurta, ururinta xogta iyo tababarka xuquuqda caruurta ku saabsan.

# Dhamaan carruurta oo dhan Finland ay leeyihiin



Finland inay noqoto meel u fiican in ilmo ku dhasho oo uu ku koro.



# Yoolka ah Finland tixgalinaysa xaquuqda carruurta

Istratejiyadan waxay abuuraysaa in Finland noqo wadan ixtiraama ilaalinta xaquuqda carruurta iyo qoyska carruurta le

Yoolka ama aragtida istaraatiijiyadan waa mid Finland ka dhigaysa in xuquuqda ilmaha loo fuliyo si qeexan ama hufan iyo si la siman bulshada inteeda kale. Hadafkaasi waxaa ka dhalanaysa in dhamaan bulshada qaybaheeda kala duwan aqoonsadaan muhiimada xuquuqda carruurta iyo sisan u aragga qoyska. Finland oo wadajirta ayaa gaadhi kartaa yoolkaas ama hadafkaas.

Finlands si san u aragta qoyska iyo carruurta waxay maalgalinaysaa nolol wanaaga carruurta iyo qoysaskooda. Nolol wanaaga waa in lagu caawiyaa qoyska masaariif nololeed ku filan, wadashaqayn iyo in si miisaaman la iskugu fadhiisiyo nolosha qoyska iyo shaqada. In dhamaan

adeegyada bulshada iyo waxyaabaha ku xidhan laga dhigo kuwa laga helo heer degmo ama xaafadeed si loo abuuro mujtamac iyo muwaadiniin firfircoon. Raacida yoolkani ama hadafkani wuxuu finland ka dhigayaa mid tayada, sinaanta iyo kala duduwanaanta barbaarinta carruurta kor u qaada, isla markaana fuliya waxbarasho ilmaha ama carruurta si fiican u korisa korna u qaada horumarka ogaalkooda. Finland inay noqoto meel u fiican in ilmo ku dhasho oo uu ku koro waxaa lagama maarmaan u ah in la ogaado carruurta xaladahooda nololeed ee kala duduwan iyo in si fudud loo aqaansan karo baahiyaha carruurta si si-adag looga hor tago gacan ka hadal carruurta loo gaysto, in la takooro iyo inuu la kulmo sinaan la'aan.

Finland laga ixtiraamo xaquuqda carruurta; waxay carruurtu qabsanayaan oo ay soo bandhigaan aragtida mastaqbalkooda iyo arimaha khuseesa, in la hubiyo inay fursad u helaan inay ogaadaan macluumaadka da'dooda u dhigma xataa hadii uu yahay mawduucyo ad-adag. Carruurtu waa inay dawr ku lahaadaan arimaha khuseeya nolol maalmeedkooda iyo deegaankoodaba, sidoo kale carruurtu way xiiseeyaan arimaha waa wayn ee khuseeya bulshadeena sida arimaha jiilasha u kala gudba. Carruurtu waa inay aqoonsadaan oo wax ka ogaadaan cimilo-doorsoonku sida uu mustaqabalkooda saamaynta ugu leeyahay sidaa si la mida tiknoolajiyada casriga ah dhibkeeda iyo dheefteeda. Ka qaybgalka carruurtu waxay leeyihiin kaalin aas aasi ah marka la raaco yoolka Finland.

Finland laga ixtiraamo xaquuqda carruurta iyo qoyska waa in hoos loo eegaa qorshayaasha iyo siyaasada loo

dajinayo carruurta iyo qoysaska. Sidaa si la mida waa in fuliyaa siyaasadahaasi. Yoolkan wuxuu farayaa bulshada inay hubiyaan arimaha saamaynta ku le carruurta in loo qiimeeyo si taxadar le go'aan qaadashada arimaha carruurta taabaya waa in lagu saleeyaa macluumaad tayo le yadoo la tixgalinayo aqoonta. Taasi waa mid finland ka dhigaysa mid u cadaalad samaysa jiilasha dhexdooda si carruurtu uga helaan khayraadka bulshada qaybtooda.

Finland laga ixtiraamo xaquuqda carruurta waa wadan dimuqraadi ah oo daskuurku yahay sal. Waxay lid ku tahay in bulshadu qaybsanto, cid gaara wax loo xidho su'aalaha arimaha bulshada in si xagjir ah loo eego taasi waxay muhiim u tahay dimuqraadiyada iyo xaquuqul isnaanka. Muhiimadoodu waxay tahay in carruurtu hesho musqaqbal iftiimaya taasi oo u dhibyaraynaysa carruurta inay ka qayb galaan bulshada rayidka ah iyo bulshadaba.

Bulsho adag iyo adkaysi u le isbedelada, xaaladaha gaar ah iyo masiibooyinka ka hor tagooda. Finland laga ixtiraamo xaquuqda mid ilaalisa xaquuqda carruurta iyo qoysaska qaybtoodana siisa khayraadka bulshada xataa mar xaaladuhu adag yihiin. Yoolkan raacistiisu waa mid ka dhigaysa Finland in xirfadaysan looga hortago khataraha musqalba yadoo la dhawrayo xaquuqda carruurta.

Finland laga ixtiraamo xaquuqda caruurta waa wadan dimuqraadi ah oo dastuurku yahay sal.



# Ka hortaga takoorida iyo kalasaraynta

## XAALADA IMIKA IYO XAQUUQUL IINSAANKA

Finland laga ixtiraamo xaquuqda carruurta waa dhamaan caruuta oo dhan. Taas ayayna Finland hergelinteeda xaquuqda carruurtu ugu xidhneyn dalka uu u dhashay ama kasoo jeedo. Xaqiiqdii in la ixtiraamo xaquuqda waxaa laga maarmaan ah in dhug loo yeesho (la ogaado) kala duwanaanshaha carruurta, kala duwanaanshaha xaaladahooda iyo baahiyahooda si loogu damaanad qaado ilmo kasta xuquuqdiisa yadoo loo eegayo da'diisa iyo heerka hormarkiisa.

Xaalada imika carruurta nolol wanaagoodu dhinac bay ka raran tahay ama dheeli baa ku jira. Carruurta intooda badan si fiican bay wax ugu socdaan laakiin qayb ka mida carruurta aad bay u liitaan. Dheeli-tirnaan la'aantu waxay aad u soo

baxdaa wakhtiga dhibaatada iyo dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinku waxay ku ururaan bulshada inteeda liidata. Adkaanshaha dakhligu wuxuu hoos u dhigaa carruurta sinaantooda iyo wada socodkooda ka qaybgalka bulshada. Kala saraynta lagula kulmo carruurnimada ama gabaabsigu waa mid la socota qofka ilaa mudarkinimadiisa iyo inay saamayn ku yeelato in jiilashada dhexdeedu isku gudbiyaan kala sarayntii iyo faqiiqnimadii.

Takoorka sababo iyo siyaabo kala duwan ayay carruurta u taabataa. Tusaale ahaan takoorida ilmuhu meesha uu ka soo jeedo, midabka jidhkiisa, diintiisa, naafo ama xanuun ama jinsigiisu wuxuu yahay.Dhamaan arimahaasi takoorka ah waxaan u garanay sharciyo lagaga hortago, laakiin ka hortaga iyo sinaanta in carruurta nolol maalmeedkooda lagu daro waa mid wali shaqo badan u baahan.

Ka sakow meelaha cilladaha iyo dhinaanshuhu ka jiro waa in loo hawl galaa si go'an, qeexan oo la hubiyey in qaybgalka carruurta ee bulshadu u dhacay sida ugu macquulsan. Waxaa muujiya kala saraynta carruurta marka diyaarinta go'aan qaadasha iyo qorshaha fulinta aan lagu salaynin xaqiiqooyin waxay saamany ku yeelataa carruurta meelo badan oo noloshooda ah.Sidaasi darteed marxalada diyaarinta, qorshaynta iyo shaqada horumarinta waa in la tixgaliyaa ilmuhu bulshada uu ka tirsan yahay iyo carruurta xaaladahooda kala duwan iyo baahiyahooda.

Ka horta kala saraynta iyo cunsiyariyadu waa mida maabaa'diida uu ku taagan yahay heshiishka ilaalinta xuquuqda carruurta ee qarabamada midoobay. Qodobka 2 aad ee heshiiskaasi wuxuu farayaa dhamaan dawladaha

saxeexay inay u aqoonsadaan xaquuqda ay leeyihiin carruurtu yaga oo aan lakala saarayn. Intaa waxaa dheer in dhamaan laga difaaco carruurta kala saraynta iyo ciqaabtaba, taasi oo ay waalidiintoon, masuul sharciyeysan ama cid qoyska ka imid ahi ku soo rogto. Kala sarayn la'aanta iyo sinaanta waxay ku qeexan yihiin heshiiska xaquuqul iinsaanka.Gudida xaquuqda carruurta ee qaramada midoobay waxay awooda saareen inay ku kabaan sidii si cilmiyeysan xaquuqda iyo nolol-samaantooda loo horumarin lahaa. Wakhti xaadirkan waxaa jirta dhinaansho iyo xog aan sugnayn, taasi oo caqabad ku ah horumarinta nolosha wanaagsan ee carruurta.

## Finland waa mid carruurta oo dhan u siman.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Siyaabo qorshaysan ayaa loo horumarinayaa carruurta sinaantooda. Waxaa la ururinayaa aqoonta ku sahabsan aragitda nolol wanaaga si looga faa'iideeyo, loogana shaqaysiiyo sida ugu macquulsan si ugu yeelato saamayn hadafka ah xusuuqda carruurta ee dhawrna ama la ilaaliyey

II

Waxaa la hubinayaa in adeegyada kala duwan, noocyada caawinta iyo dariiqooyinka ka qayb-galku yihiin kuwo ku salaysan cadaalad iyo sinaan oo dhamaan carruurta wada gaadha. Waxaa la horumarinayaa helitaanka macluumaadka iyo hawlaha kala duwan ee bulshada si ku haboon carruurta yadoo la tixgalinayo kala duwanaanta carruurta.

# Carruuraha ku jira xaalada nuglaanshaha sugidda xuqooqdooda

# XAALADA IMIKA IYO AAS AASKA XAQUUQDA AADANAHA

Carruurtu darajooyin iyo qaabab kala duwan ayay u noqon karaan kuwo nugul, taasi oo ka rabta in saraakiisha ku shaqada le arimaha carruurta iyo dadka la shaqaynta la le carruurta inay fiiro gaara u yeeshaan carruurta. Nuglaanshuhu wuxuu noqon karaa mid mudo dheer qaata oo ku yimi takoor nidaaaysan keenay sida curyaanimo, xanuun ama midab takoor. Dhinaca kale nuglaanshuhu wuxuu noqon karaa mid xaalad ku yimi sida hadii uu ilmuhu u yahay macmiil hay'ada badbaadada carruurta ama dambi dhibane u ah, eedaysane, ama la xukumay. Waxaa markaa muhiim ah in wax walba oo khuseeya ama taabanaya dhamaan carruurta sida go'aan qaadashada iyo fulinta in fiiro gaara oo xasaasiyad ku dheehan tahay xaalad kasta iyo arimaha la xidhiidha xaaladaasi xaqiiqadooda.

Masuuliyiinta fulinaysa waajibaadka xaquuqul iinsaanka kuma filna in carruurta intooda badan wax walbaaba si wanaagsan ugu socdaan. Wakhti xaadirkan carruurtaasi sabab ama sababo kale ugu jira heerka nuglaanshaha mar walba ma helaan gargaarkii iyo caawinadii ay u baahnaayeen. Adeegyada loogu talogalay carruurtu mar walba uma gaadhaan sidii baaxada lahayd ee aan isbabadelka lahayn iyo in helitaanka adeegu u baahan yahay awood taasi oo ayna dhamaan carruurtu ama qoysasku lahayn. Carruur badan waxay la kulmaan takoor nidaamaysan ama hab-dhaqan aan dabacsanayn xilliyada ay baahida aad ka ah u qabaan gargaarka ama caawinaada.

Carruurta waxaa ku sababi kara heerka nuglaanshaha in xaalado iyo dhibaatooyin kala duwan hal mar ku kulmaan. Arinkaasi wuxuu caqabad ku noqdaa saraakiisha iyo hay'adaha dawliga ah ee carruurta ku shaqada le inay miisaan xaaladaa xasaasiga ah in uu helo faa'iidada wada shaqaynta xirfad layaal kala duwan. Waana in la hubiyaa in hawlahaasi uu ilmuhu ka qayb noqde ee aanu dhibane u noqon xaalada uu ku sugan yahay.

Heshiiska qaramada midoobay ee xuquuqda carruurtu qodobka 20 aad wuxuu si gaara u dul istaagayaa in fiiro gaara loo yeesho carruurta ku jirta heerka nuglaanshaha sida kuwa dagan banaanka gurigooda ama meel aan gurigooda ahayn. Qodobka 23 aad wuxuu si gaara uga hadlayaa carruurta curyaamiinta ah iyo qodobka 30 aad oo ka hadlaya carruurta kasoo jeeda bulshooyinka laga tiro badan yahay in la ilaaliyo. sidoo kale carruurta ku jirta heerka nuglaanshaha waa in la badbaadiyaa sida qodobada kale xuquuqul iinsaanku ina farayaan waana in la dhaqan galiyaa hay'ad kormeer.

**Kuma filna in caruurta intooda badan wax walbaaba si wanaagsan ugu socdaan.**

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Waa in si buuxda fiiro gaala loogu yeesho ka hortaga heerka nuglaansha, hawlaha lagu dib u sixida, adeegga iyo hab-dhiska ilaalinta xuquuqda. Waa lagu darayaa intaa ka hortaga iyo kaalmo curdin  ah waxyaabaha ka maqan ama ay u baahan yihiin.

II

Waxaa intaa la  raacinayaa waxqabashooyin u gaar ah carruurta ku jirta heerka nuglaanshaha si loo fuliyo xuquuqdooda. Waxaa la xoojinayaa hababka shaqada xirfadlayaasha, wada shaqayn nidaamsan oo ku haboon ilmo kasta iyo reerkasta gaar ahaantiisa si loogu kuur galo baahiyiisa gaar ah. Waxaa fiiro gaara loo yeelanayaa xaalada taagan yadoo la tixgalinayo dadka ku hareeraysan doorka ay ilmaha ku leeyihiin iyo xuquuqdiisa.

III

Waxaa la dajiynayaa habab lagu garan karo oo loogu kuur gali karo saamaynta takoorka nidaamaysan iyo  ka xaaladu keentay ee ilmaha ku jira heerka nuglaanshaha. Waa in la aqoonsadaa noocyada kala duwan ee nuglaanshaha, xaalada carruurta iyo dhibaatooyinka iskugu ururay.

# Carruurta oo waxyeeladda laga badbaadiyo

## XAALADA IMIKA IYO AAS AASKA XAQUUQDA AADANAHA

Finland waxay awooda saartay in la horumariyo shaqada ka badbaadinta carruurta gacan ka hadalka. Si wanaagsan baa loo aqaansadaa dhibaatooyinka ka dhasha waxyeelaynta ilmaha loo gaysto. Dareenka loo yahay ilmaha gacan loo gaystayna waa la adkeeyey.

Wali waa caqabad in la ogaado gacan ka hadalka iyo silica ay carruurta soo gaadhsiiyaan xidhiidhka ehelkooda iyo filkooda ( facooda). Si fiican mar walba uma gaadho nimaadka adeeggu goorta iyo goobta looga baahan yahay. Carruurta la kulma gacan ka hadalka, silcinta, saxariirinta, bahdilida ama la faraxumeeyo waxay saamayn ku leedahay ilmaha aayaha noloshiisa dambe, intaa waxaa dheer ilmaha

ehelkiisu sida la arkey waxyeelada u gaystaa waxay u daran tahay ilmaha.

Inkastoo la adkeeyey foojignaanta loo leeyahay waxyeelaynta carruurta loo gaysto, hadana carruur badan ayaa si maalin le ah ula kulma waxyeelayn, arbushaad, isticmaalid, yasitaan. Carruurtu waxyeelayn waxay kala kulmaan guriga banaankiisa sida iscuulka, hiwaayadaha sida kubada iwm, baraha bulshadu ku kulmaan ee interneetka, khibradiisu maaha mid ku filan oo ku aqoonsan karo dhib wadaha. Carruurta laftarkoodu khatar bay galin karaan caafimaad-qabkooda hadii hab-dhaqankoodu yahay mid dhib wata.Intaa waxaa raaca carruurta la kulmay waxyeelayntu ma helaan kaalmo ama taageero fiican isla markiiba, carruurta waxyaalada joogtada looga dhigay looma suurto galiyo caawinaad ku filan.Waxyeelaynta carruurta dhexdooda ka dhacda ama si kale ilmo waxyeelo u gaysta sidii la rabay looma dhex galo.

Interneetku waa qayb wayn oo muhiima nolol maalmeedka carruurta, laakiin waa mawjad ay kasoo qul-qulaan rabshoolayaasha iyo qas wadayaashu. Carruurta internerka dhexdiisa kala kulma handadaado faraxumayn marka la eego waa mid si guud u jirta. Carruurta inuu yaqaano arimaha khuseeya badbaadiisa iyo in la xoojiyo sida loola dhaqmo dadka interneetka ku jira carruurta waxay ka caawinaysaa inuu ka fogaan karo qaybo ka mida rabshadahaasi, iyo in la hubiyo inay carruurtu heli karaan caawinaad aad ugu dhaw ama ku haboon. Carruurta la kulma faraxumayn iyo ka danaysi xun waa in isla markiiba la fari galiyaa arintaasi.

In carruurta laga badbaadiyo waxyeelaynta waa mid ka mida arimaha heshiiska dhawrida xaquuqda carruurta udub dhexaad u ah iyo inuu leeyahay xuquuq nololeed oo ay damaanad qaadeen heshiisyada xuquuqul iinsaanku. Qodobka 19 aad ee heshiiska caalamiga ahi wuxuu farayaa dawlada heshiiska saxeexay inay isku hawlaan hirgilanta sharciyadeed, maamuleed, bulsheed iyo aqooneed ee carruurta lagaga badbaadinayo dhamaan waxyeelooyinka jidheed iyo nafsiyadeed sida dhaawicida ama jidh dilka,dayacaada ama danayn la'aanta, si xun ula dhaqmida ama isticmaalka. Hujuumidda waxyeeleynta carruurta lala beegsanayo udub dhexaad u tahay heshiisyada xaquuqul iinsaanka sida heshiishka Istanbul iyo Lanzaroten,iyo heshiishyada ikhtiyaarka ahba.

Ilmo kastaa wuxuu xaq shuruud la'aana u leeyahay inuu noolaado iyo in laga difaaco dhamaan waxyeeloyinka noockasta oo ay yihiinba.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

**I**

Ilmokastaa wuxuu xaq shuruud la'aana u leeyahay inuu noolaado iyo in laga difaaco dhamaan waxyeeloyinka noockasta oo ay yihiin.

**II**

Waxaa la sii wadayaa shaqada lagaga soo horjeedo waxyeelaynta carruurta. Waxaa la xoojinayaa xirfadaha waalidnimada iyo ka kaalmeynta waalidnimada si loo xanibo hababka tarbiyadeed ee khariban si loogu badelo habab kale oo ixtiraamaya xaquuqda carruurta iyo doorkooda.

## III

Waxaa la xasilinayaa, hawlaha qorshaysan ee lagaga hortagayo waxyeelaynta iyo arbushida carruurta iyo sidii loo farigalin lahaa markiiba. Waxaa fiiro gaara la saarayaa waxyeelooyinka iyo arbushaada ka dhacda interneetka iyo waxyeelooyinka lagu faafiyo interneetka. Waxaa la dhidibada loo taagayaa aqoon u yeelashada badbaadada iyo interneetka yadoo la xoojinayo qaababka tarbiyada iyo tacliinta.

## IV

Waxaa lagu dhaqaaqayaa waxqabadyo qorshaysan oo lagaga hortayo waxyeelaynta iyo arbushaada lagula kaco carruurta yadoo xooga la saarayo u adeegada carruurta la kulmay tacadiyadaasi iska markaana waxaa waxaa lagu cadaadinayaa dhamaan maamulada kala duwan ee meelaha ka duwan ka jira inay kasoo horjeestaan ka ganacsiga carruurta iyo dadka.

## V

Waxaa la kobcinayaa habab lagu aqoonsado waxyeelaynta iyo silcinta sida deg dega badan ee ugu macquulsan si ilmuhu u helo markiiba adeegii uu u baahnaa. Waxaan ka hortagaynaa in uu ilmuhu dhibane u noqdo waxyeelayn isla markaana waxaan horumarinayaa diyaar garawga farogalinta waxyeelaynta iyo xaaladaha darxumo ama silcineed.

# VI

Waxaa la raadinayaa kuwo xoogan, khubaro xirfado kala duduwan leh iyo nidaamyo badan oo kala duwan oo laga hortagi karo in uu ilmuhu u dhaqmo ama yeesho dabeecad waxyeelo keenaysa. Waxaan la ilaalinayaa badbaadada carruurta sida ugu macquulsan ee loo fulin lahaa daryeelka meelaynta ee loo baahan yahay, sidoo kale  waxaa laga qayb galinayaa qoyska oo laga taageero sidii shaqada carruurta loogu garabsiin lahaa .

# Carruur badqabta oo aqoon leh

Hadafka ugu wayni waa in caruurtu ku noolaadaan nolol wanaagsan.


K
NJ
Á
H
Đ
F
Ž
S
Č
J

# Adeegyada caafimaadka- iyo arrimaha bulshada ee carruurta iyo qoyska

## XAALADA IMIKA IYO AAS AASKA XAQUUQUL IINSAANKA

Hadafka ugu wayni waa in carruurtu ku noolaadaan nolol wanaagsan, taasi oo ay taageero qoyska iyo carruurtuba ka helayaan hay'adaha ku shaqada le.Nidaamka adeegga bulshada iyo caafimaadka waa in loo fahmaa inuu yahay nidaam saddex darajo oo kala saraysa ku dhisan: darajada ugu horeysaa waa la dagaalanka iyo ka hortaga inay yimaadaan dhibaatooyin caafimaad iyo bulsho, darajada waxaa lagu dadaalayaa in laga hortago dhibaatooyin caafimaad iyo bulsho oo la ogaaday inuu sii xumaado iyo darajada saddexaad oo ah waxaa lagu dadaalayaa hagaajinta iyo lagu fududeeyo kuwo sida halista ah u kobcay jirro awgeed ama dhibaatada saamaynta bulsho dhexgalka ahi haysato.

Nidaamka wakhtiga xaadirkan jiraa mid firidhsan oo kala daadsan, khaasatan carruurta iyo qoysaska u baahan adeegyo ayaa xaqiiqdii ku soo dhaca meelo madhan oo aan helin caawinaad iyo taageero toona. Waxaa la ogaaday inay dhibi ka jirto iswaafajinta adeegyada sida ku aas aasiga ah iyo kuwa darajada gaarka ah, dhibtaasi iskuduwid la'aantu waa mid ka jirta adeegyada dadka dhimirka ama maskaxda wax ka qaba iyo adeegyada guud ee caafimaad iyo bulshada. Dadka naafada ah iyo qoysaskooda adeegyada la siiyo yagana waxaa ka jira iskuduwidooda goddaloolooyin, taasi oo saamayn xoogle ku le taageerada koritaanka carruurta. Caqabadaha nidaamka adeegyadu waxa kale oo ay jirtaa sidoo kale badbaadada carruurta.

Maskax caafimaad qabtaa waxa dhismaheedu soo bilaabmaa carruurnimada, waa sababta caawinta dadka dhimirka wax ka qaba iyo daryoolkoodu ay aas aas u tahay in nolol wanaaga carruurnimo. Dhibaatooyinka caafimaadka dhimirku waa mid wadanka caqabad ku ah, adeegyada la xidhiidha dhimarkuna maaha kuwo darajo ahaan loo fuliyo sida adeegyada kale ee caafimaad iyo bulsho. Dhibaatooyinka dhimirka daryeelkoodu waa mid u baahan in la hubiyo inay adeegyadu si fiican u shaqaynayaan isla markaana ay yihiin kuwo ka madaxbanaan inay ururaan tagoorid iyo dhabaatooyin kaleba.

Helitaanka carruur badqab ku nool oo xuquuqdooda la dhawray waxay u baahan yihiin dad tabobaran, xirfadle isla markaana caafimaad qaba ooh ab-dhaqankooda ay ka muuqato aqoon iyo isku xidhnaan. In la yareeyo isbabadelka shaqaalaha adeega caafimaadka iyo bulshadu waa mid kor u qaadaya tayada iyo sii socashada, marka uu ilmuha loo

adeegayaa uu aamino shaqaalaha kalsooni iyo badbaado ayuu dareemayaa. Wakhti xaadirkan hadafyadaasi maaha kuwa fulay, shaqaaluhuna meelo badan ayay ku badan yihiin isbabadelkooduna waa mid wayn.

Qorshaha adeeggu wuxuu noqonayaa mid ku salaysan carruurta iyo qoysaska si  loo helo karo adeeg fiican isla markaana ku filan. In adeeg iyo taageero ku filan ilmuhu helo wakhti hore waxay wanaajinaysaa tayada nolosha iyo nolol maalmeedka. Hagaajinta adeegyada daryeelka caafimaadka iyo bulshadu waxay awood siinayaan wadashaqaynta waxqabadka iyo hiwaayadaha lala sameeyo bulshada inteeda kale.

Adeegyada caafimaadka iyo arrimaha bulshada waa kuwa buuxinaya heshiiska qaramada midoobay ee xaquuqda aadanaha . Qodobka 24 aad ee heshiiska qaramada midoobay wuxuu adkaynayaa in ilmo walba xaq u leeyahay inuu helo caafimaad iyo adeeg caafimaadba. Dastuurka qodobkiisa 19.3 §: wuxuu sheegayaa in qofkastaa waa inuu helaa adeeg caafimaad iyo bulsho oo ku filan si mujtamaca oo dhan caafimaadkiisa loo hubiyo. Midawga yurub cusboonaysiinta adeegyada caafimaadka iyo bulshadu sidaasi bay farayaan.

**Ilmo kasta waa inuu helaa deegaan nabdoon oo ku kori karo.**

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

## I

Waa la horumarinayaa adeegyo u dhaw carruurta iyo qoysaskaba, kuwaasi oo helitaankoodu fudud yahay  yagoo qaabab kala duwana le matalan xarun qoysaska lagu caawiyo.Waxaa la aqoonsanayaa suurto galnimada horumarinta in la odorosi karo ama la garan karo iyo qaabab looga hortagi karo si loo siiyo markiiba taageero loona xoojiyo ogaanshaha adeegyada, baahida shakhsiga ah iyo dariiqyada sida lagu helo karo adeegyadaa. Waxaa shaqaalaha lagu caawinayaa kor u qaadida xirfadooda, nolol wanaagooda iyo inay joogto noqdaan.

## II

ilmo kasta waa inuu helaa deegaan nabdoon oo ku kori karo jidh ahaan iyo maskax ahaanba. Waxaa la horumarinayaa adeegyada la siinayo dadka qaba xanuunada dhimirka (caafimaadka maskaxda) sii loo hormariyo qaababka shaqada iyo balaadhinteedaba.

## III

Waxaa fiiro gaara si balaadhan loogu yeelanayaa guud ahaan adeegyada caafimaadka iyo bulshada si loo mataaneeyo ama mideeyo waxqabadyada khuseeya nolol wanaaga, horurinta caafimaadka, hawlahooda iyo bulshadaba.Waxaa la horumarinayaa waxyaabaha ururadu baahan yihiin si ay u bixinayaan adeegyada dhamaystiraya taageerida carruurta iyo qoyska.

# IV

Waxaa fiiro gaara loo yeelanayaa dadka ku jira heerka nuglaanshaha, sida carruurta u baahan caawinaadagaarka ah iyo baahida adeegaba. Waxaa la kobcinayaa badbaadada carruurta tayadooda iyo hawlahooda si loogu diyaar garoobo in la fuliyo dhawrida xuquuqda ilmaha oo buuxda. Waxaan taageeraynaa habab wanaagsan oo loo mariyo adeegyada badbaada carruurta iyo deegaankoodaba.

# V

Waxaan fiiro gaara loo yeelanayaa dadka waa wayn inay helaan yaga iyo carruurtooduba adeegyo qorshaysan oo ku buuxinaya heerkooda iyo xuquuqdoodaba. Waxaa la aqoonsayaa xaaladaha qoysas-ka carruurtu kasoo jeedaan iyo waliba in si ka fiican sida imika fiiro dheeraada loogu helo  qaab dhis-meedka qoysaska iyo kala duwanaanshahoodaba.

# Barbaarin-horaadka iyo waxbarashada

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

Barbaarin-horaadka iyo tacliinta sinnaanta iyo tayada leh waa awoodaha Finland. Waxaa ay dhankooda ka suuro galiyeen horumarka Finland ee aqoonta, halabuurka iyo teknolojiyadda ku sal leh. Tobonada sano ee soo socda tacliintu waxaa ay ahmiyad dheeraad ah u yeelanaysaa ka jawaabidda isbaddalka shaqada. Finland waxaa jooga dad si fiican wax loo baray, macallimiin heer jaamacadeed loo taba baray iyo nidaam wax barasho oo aad u wanaagsan, kaas oo lagu soo saaro aqoon heerkeedu sareeyo oo lagu horumarinayo nolol wanaaga baaxadda leh ee carruurta.

Barbaarin-horaadka, waxbarasho-horaadka iyo tacliinta tayada iyo sinnaanta leh waxaay simayaan sinnaan la'aanta nolol wanaaga carruurta ku jira ee ay keeneen kala duwanaanshaha noloshoodu. Baadhitaanada waxaa lagu arkay in ka qaybqaadashada barbaarin-horaadka tayada leh aay saamayn ku leedahay waxbarashada dambe. Finland waddamo badan marka la barbardhigo heerka ka

qaybqaadashada barbaarin- horaadku waa mid hooseeya inkastoo a qaybqaadashada barbaarin-horaadku ay saamayn muddo dheer ah aay ku leedahay korriinka ilmaha ee baaxada leh. Ka qayb qaadashada waxbarasho-horaadku waa mid badan waxaana ka qaybqaata ku dhawaad da'da xaq u leh oo dhan. Haddii dhigashada iskoolku ay khalkhal gasho ama natiijada waxbarashadu ay hooseyso inta aanan dugsiga dhexe la dhammaynin, halista ka takoormida bulshada ayaa si muuqata kor ugu kacda.

Barbaarin-horaadka, waxbarasho-horaadka iyo dugsiga dhexe waxaa weeyaan adeegyo xadaaradeed oo laf dhabar u ah nolol maalmeedka ilmaha. Waxaa kuwaas ku hirgala waxqabadka iyo ka qaybgalka ilmaha. Barbaarin-horaadka iyo tacliinta waxaa muhiim ah in fiiro gaar ah loo yeesho baahiyada shaqsiyeed ee kala duwan ee carruurta iyo xaaladahooda nololeed iyo arrimaha nuglaanshaha gaarka ah keeni kara. Wadashaqaynta shaqaynaysa ee noocyada badan leh waxaa lagu taageerayaa waxbarashada iyo nololwanaagga ilmaha iyo qoyska uu ka dhashayba. Waa in in ku filan la helaa kaalmada waxbarashada. Heerarka waxbarasho ee kala duwan ayaa sii badanaya muddada lagu jiro dugsiga dhexe, kala duwanaanshaha ugu badan ee kooxaha kala duwan dhexdooda yaalaa waxaay soo baxaan marka lagu dhawaado da'da dhamaynaysa dugsiga dhexe. Welwelka jiraa waxaa weeyaan in kala duwanaanshaha waxbaashada ee wiilasha iyo gabdhaha dhexdooda ka jiraa aay yihiin kuwa ugu sareeya waddamada OECD, waana kuwo marba marka kasii dambeysa sii badanaya.

Marka aay ugu fiicanyihiin barbaarin-horaadka iyo tacliintu waxaay xoojinayaan xuquuqda ilmaha ee

waxbarasho, waxaayna u siinayaan meel uu xidhiidh qeyrkii kula yeelan karo, bulshadu ay ku wada xidhiidhi karto iyo meel lagu dhiso nolol wanaag muddo dheer soconaya. Waxbarashada waxaa dheer oo aay tahay in fiiro gaar ah loo yeesho nolol wanaaga waana in la hubiyo in kaalmaynta ilmaha iyo daryeelka ardaydu ay yihiin kuwo heerkoodu sareeyo. Waxbarashada iyo nolol wanaagu waa waxyaabo is taageera oo is horumariya. Waxbarashadu waxaay dhalisaa nololwanaag, nololwanaaguna wuxuu dhaliyaa waxbarasho. Ka hor taga dhibitaanka iyo gacan ka hadalka shaqada ku salaysan waxaa loogu baahanyahay qaabab shaqaynaya iyo dhaqaale, xoog iyo aqoon lagu hirgaliyo. Aqoonta, dhaqaalaha iyo xooga lagu hirgalinayo waxaa dheer oo muhiim ah in la hubiyo in carruurta la maqlo oo laga qaybgaliyo barbaarin-horaadka iyo tacliinta aay yihiin kuwo si is leh oo baaxad leh u suuro galaya.

Heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay qodobkiisa 28-aad waxaa uu amrayaa in ilmo kasta uu xaq u leeyahay in uu helo waxbaris. Qodobka 29-aadna waxaa lagu qeexayaa hiigsiyada tacliinta. Qodobka 28-aad dowladaha heshiiska ku galay waxaay sidoo kale ballan ku galayaan inaay waxqabad ku saabsan joogtaynta waxbarashada iyo yaraynta joojinta waxbarashada suuro galinayaan. Sharciga aasaasiga ah qodobkiisa 16§ waxaa lagu hirgalinayaa xuquuqda xadaaradeed waxaana lagu qoondeynayaa xuquuqda uu qof kastaa u leeyahay waxbaris aasaasi ah oo lacag la'aan ah. Barbaarin-horaadka iyo tacliintu waxaay macne muhiim ah u leeyihiin hirgalinta waajibaada kale ee xuquuqul insaanka.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

## I

Waan in natiijooyinka waxbarashada kor loo qaadaa oo la yareeyaa sinnaan la'aanta iyaga oo loo isticmaalayo waxqabadyo hiigsiyo leh oo qorsheysan. Waa in la hubiyaa in dhaqaale, aqoon iyo xoog ku filan ay ka jiraan barbaarin-horaadka iyo suuro galinta tacliinta. In ilmo kasta la hubiyo in uu leeyahay fursad baahiyadiisa gaarka ah ku habboon oo dhanka tacliintiisa ah iyo suuro galinta waxbarashada iyo hirgalinta xirfadda ee baaxadda leh. In la hubiyo kooxaha kala duwan ee carruurta ah darajadooda oo fiiro gaar ah loo yeesho nuglaanshahooda iyada oo la xoojinayo wadadhaqanka bulahsada iyo ka dhaqanka suuro galinaya ka qaybgalka leh, isdhexgalka shaqaynaya iyo waddooyinka baahiyaha shaqsiyaadka ku sal leh ee waxbarasho.

# II

In loo garto barbaarin-horaadku in uu qayb muhiim ah oo nidaamka waxbarasho ku jira uu yahay. In kor loo qaado heerka ka qaybgalka barbaarin-horaadka iyada oo si baaxad leh loo bandhigayo macnaha barbaarin-horaadku uu shaqsiga iyo bulshada u leeyahay, iyada oo si qorsheysan loo yareynayo lacagta macaamiisha oo la balaadhinayo lacag la'aanta. Hiigsigu wuxuu yahay in muddada dheer lagu gaadho barbaarin-horaad lacag la'aan ah. In tayada barbaarin-horaadka la kordhiyo iyada oo tusaale ahaan la hubinayo in aay joogaan shaqaale ku filan oo waxbarasho heer jaamacadeed leh lana qiimeynayo oo loo kobcinayo waxqabadka siyaabo badan. In la wanaajiyo in wakhti hore la barto xirfadaha aasaasiga ah iyo xidhiidhada isla falgalidda in la adkeeyo iyada oo la horumarinayo waxbarasho-horaadka iyo bilowga waxbarashada dugsiga dhexe. In naadiyada subaxa iyo galabnimada sidan si ka fiican looga qaybgaliyo maalinta iskool dhigashada oo xoog la saaro horumarinta tayada waxqabadkaas.

# III

In la sugo shuruudaha suuro galinaya waxbarashada, korriinka iyo garabsiinta waxbarashada iyo sidoo kale shaqaalaha barbaarinta iyo waxbarashada shaqadooda iyo adeegyada daryeelka ardayda iyo waxbarashada. Waa in la hubiyaa hirgalida wadashaqaynta noocyada badan si carruurta iyo qoysasku aay u helaan kaalmo baaxad leh. In laga faa'idaysto qaababka jira ee ka hor taga joojinta waxbarashada iyo takoorka, qaabab cusubna la raadiyo. In fiiro gaar ah loo yeesho marxaladaha kala wareega waxbarashada. In lahubiyo in uu ilmo kastaa dugsiga dhexe kaddib ugu yaraan diyaarin karo waxbarashada darajada labaad ah ee dugsiga sare ama xirfadda ah.

# IV

In la kobciyo aqoonta oo la siyaadiyo dhaqaalaha iyo awoodda lagu kaalmeynayo nolol wanaaga barbaarin-horaadka, iskoolka iyo iskuimaatinada bulshada ee nololmaalmeedka kale dhaca. Kahor taga dhibaataynta iyo horumarinta nabadgaliyada shaqadu waa in aay noqdaan kuwo qorsheysan oo ah waxqabad nololmaalmeedka la socda. In la adkeeyo awoodaha dareenka iyo wada dhaqanka marka la joogo barbaarin-horaadka iyo iskoolada. In wax laga qabto dhibaataynta oo laga hortago gacan ka hadalka waxqabadyada loo qorsheeyay shaqayntooda waa la qiimeynayaa, waxaana la faafinayaa waxqabadyada loo arkay inaay si fiican u shaqeeyaan waxaana la abuurayaa kuwo cusub marka loo baahdo.

# In qoysku aay helaan dakhli ku filan iyo isku duwidda nolosha qoyska iyo ta shaqada

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

In qoysku uu helo takhli ku filan waa qayb ka mid ah nolol wanaaga ilmaha. Awoodda dowliga ah ayaa ku shaqo leh taagerida qoyska iyo ciddii kale ee daryeelka ilmaha ka mas'uul ah si loo suuro galiyo nolol wanaaga ilmaha iyo korriinka ilmaha ee shaqsiyeed. Dhaqaalaha dowladeed ee Finland waxaa culays ku haya misaan darada ka jirta xidhiidhka daryeelka bulshada iyo taranka hooseeya. Caqabadaha qoysnimada iyo taranka oo yaraadaa waa dhibaatooyin marka laga eego dhanka biniaadantinimada. Heerka shaqada sidan ka sareeya iyo nolosha shaqada iyo

qutuldaruuriga oo si fiican u shaqaysa waxaay sal u tahay waaritaanka dhaqaalaha dowladda.

In xuquuqda carruurtu ay hirgalaan waxaa ku xidhan in qoysasku ay helaan shabakado kaalmeyn ah oo kuwa imika ka adag, si culayska qoysaska haysta iyo saboolnimada qoysaska carruurta leh aanay u noqonin wax carruurta ku keena darxumo. Waxaa la ogayhay in takhliga hooseeya ee qoyska iyo darajada shaqada ee hooseysa ee qoysku ay daciifiso darajada carruurta marka dhinacyo badan laga eego, waxaana la ogyahay in halistaas ay si gaar ah uga jirto qoysaska hal waalid uu ka mas'uulka yahay. Saboolnimada qoysaska carruurta leh mar kasta ma aha wax la xidhiidha shaqo la'aanta, waxaa jirta in ku dhawaad badh ka mid ah qoysaska carruurta leh ee xaalad saboolnimo ah ku jira waalidkoodu uu yahay waalid shaqeeya.

In qoysku uu helo takhli ku filan waa qayb ka mid ah nolol wanaaga ilmaha.

Nolol wanaaga qoysaska waxaa horumarinaya fursadaha dabacsan iyo kala doorashada shaqada si la iskugu fadhiisiyo shaqada iyo qoysnimada marxaladaha kala duwan ee koriinka carruurta marka lagu jiro. Nolosha shaqada ee u wanaagsan qoysaska waa wax u yaala mushtamaca oo dhan: marka aay ugu fiicantahay fursadaha shaqada dabacsan ama ta wakhtiga shaqada qayb ka mid ah la qabanayo waxaay caawinayaan in la hirgaliyo xuquuqda ilmaha iyo in laga jawaabo baahida maaraynta nolosha ee qoyska. Xaaladda imika jirta marka fiiro gaar ah loo yeesho xaaladda qoyska waxaa jira carqalado badan oo hor taagan iswaajafinta shaqada iyo qoysnimada.

Doorka udub dhexeedka ah ee qoysasku ay u leeyihiin hirgalinta xuquuqda carruurta waa mid lagu garowsaday qaar badan oo ka mid ah qodobada xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay iyo sidoo kale heshiisyo kale oo badan oo xuquuqul insaanka ah oo ku saabsan xuquuqda dhaqaalaha, wadadhaqanka bulshooyinka iyo xadaaradda. Qodobka 26aad ee xuquuqda carruurta ku saabsan ee Qaramada Midoobay waxaa si gaar ah loogu dhigayaa in ilmo kastaa uu xaq u leeyahay taakuleynta dowladda. Sharciga aasasiga ah ee Finland qodobkiisa 19.3§ waxaa uu dhigayaa in dowladdu aay ka mas'uul tahay in aay dajiso xeerar aay ku buuxinayso xuquuqda aasaasiga ah ee taakuleynta nololeed ee qoyska iyo cidda kale ee ku shaqada leh daryeelka ilmaha, si loo hubiyo fursadaha ilmaha ee nolol wanaaga iyo korriinka shaqsiga ah.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Waxaa ka go'an dowladda in si natiijo doon ah mushtamaca oo dhan looga yareeyo saboolnimada qoysaska carruurta leh. Hubinta takhliga qoysaska carruurta leh iyo yaraynta saboolnimada qoysaska carruurta leh waxaa kor loogu qaadayaa hiigsiyada awoodda la saarayo ee kor u qaadidda amniga taakuleynta dowladda.

## II

Waxaa si wadajir ah loo kobcinayaa tixgalinta qoysaska ee nolosha shaqada, waxaana la garowsanayaa qaababka kala duwan ee shaqada loo qaban karo. Isku duwidda shaqada, waxbarashada iyo qoysnimada sidan si ka fiican ayaa fiiro gaar ah loogu yeelanayaa qoysaska iyo qaababka qoysnimo kala duwanaanshahooda iyo muddada carruurnimada oo dhan. Waxaa la kordhinayaa fursadaha dabacsanaanta leh ee qoysku ay daryeelka carruurtooda ula qaybsan karaan waalidka iyo dadka kale ee u dhoow sida waalidka waalidkood dhexdooda. Waxaa la sugayaa doorashada xor ay qoysasku u yihiin qabanqaabada guri ku haynta carruurtooda waliba kuwa sii yaryar.

## III

Waxaa fiiro gaar ah loo yeelanayaa qoysaska iyo qaababka qoysnimo kala duwanaanshahooda marka la bixinayo kaalmeynada kala duwan ee qoysaska ku si toos ah ugu socda ama meel loo marinayo. Kaalmeynada iyo taageeridda qoysaska ku socda marka la horumarinayo waxaa sida imika si ka fiican fiiro gaar ah loogu yeelanayaa baahiyada wakhtiga aay carruurtu aad u yaryaryihiin ka sokow carruurnimada wakhtiyadeeda kale xitaa.

# Xidhiidhada carruurta filkooda iyo dadka qaraabada u dhow ah

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

Xidhiidhada carruurta qayrkood iyo dadka qaraabada ah ee u dhow saamayn wayn ayaay u leeyihiin carruurta iyo dadka waawaynba. Xidhiidhada dadka carruurta qaraabada u dhow waxaay xoojiyaan nololwanaaga waxaayna ka difaacaan qofka saameynta dhibaatooyinka nololeed ay yeelan karaan. Baadhitaanadu waxay dhigayaan in carruurta badankoodu ay xidhiidh fiican la leeyihiin waalidkood oo aay leeyihiin asxaab ay isku dhowyihiin, waxaanad moodaa in astaamaha tirada arrinkaas la xidhiidhaa in uu sannadadii dambe sidii hore ka sii fiicanaday. Xidhiidhka fiican ee uu ilmuhu la leeyahay waalidka waalidkii waxaay dhankooda ka taagerayaan korriinka ilmaha ee baaxadda leh.

Balse carruurta oo dhan ma laha xidhiidhada carruurta filkooda iyo dadka qaraabada ah ee u dhow aay la leeyihiin oo taageeraya nololwanaagooda. Carruur badan ayaa kalinimo, darxumo, waxyeelo iyo xaalado qoyseed oo adag la kulma. Saameynta arimahaasi aay nolol wanaaga ku leeyihiin waa kuwo miisaan culus leh oo badanaa mustaqbalka fog xitaa ilmaha saameyn ku yeesha.

Kalinimadu waxaay ku ururtaa carruurta markooda horeba xaaladooda nololeed aay mid nugul tahay. Si gaar ah waxaay u saameysaa daryeelka meeleynta ah carruurta ku jira ama si kale guryahooda uga maqan oo xidhiidhka dadka qaraabada ah ee u dhow ay la leeyihiin uu yahay mid xadidan. Dhibaatooyinka la xidhiidha qutul daruuriga qoysaska leh waxaay carruurtooda ku sii kordhisaa halista aay ugu jiraan inaay kalinimo ama takoor la kulmaan. Aragtida ilmaha iyo ilaalinta xidhiidhada dadka ilma u dhoow waxaa suuro gal ah in marmar sidii loo baahnaa looga fiirsan waayo marka aay jirto xaalad furriin ah oo adag.

**Caruurta badankoodu ay xidhiidh fiican la leeyihiin waalidkood oo ay leeyihiin asxaab ay isku dhowyihiin.**

## Nawaaxiga dhijitalka ah ayaa marba marka ka dambeysa saamayn xoogan ku yeelanaya xidhiidhada caruurtu ay qayrkood iyo dadka qaraabada ah ee u dhow ay la leeyihiin.

Nawaaxiga dhijitalka ah ayaa marba marka ka dambeysa saamayn xoogan ku yeelanaya xidhiidhada carruurtu ay qayrkood iyo dadka qaraabada ah ee u dhow ay la leeyihiin. La xidhiidhka asxaabta iyo dadka ilmaha qaraabadiisa dhow ah badanaa wuxuu ka dhacaa internetka, waxaayna qaababka wadaxidhiidhka ah ee la kala fogyahay suuro galinayaan in la wada joogi karo iyada oo marxalado kala duwan lagu jiro. Isla markaas nawaaxiga dijitaalka ah wuxuu siyaadinayaa baahida loo qabo in la dhexgalo dhibaateynta, qashqashaadda iyo waxyeeleynta kale iyada oo la isticmaalayo habab cusub, sababta oo ah wuxuu suuro galiyaa mowjado cusub oo dhacdooyanka dhibaatada leh ay ka soo bixi karaan.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

In la sugo xuquuqda uu ilmuhu u leeyahay in uu la xidhiidho waalidkii, walaaladii iyo dadka kale ee ilmaha u dhow marxaladaha kala duwan ee nolosha. In fiiro gaar ah looyeesho danta ilmaha iyada oo la eegayo muhiimadda aay leeyihiin dadka waawayn ee ilmaha daryeela sida hooyada, aabaha iyo waalidkii waalidkood.

II

In si natiijo raadis ah loo kobciyo waxqabadyada lagaga hortagayo kalinimada carruurta iyo xoojinta xidhiidhka qayrkood aay la leeyihiin. In la taageero bulshaawinimada iyo wada dhaqanka nololmaalmeedka carruurta, barbaarin-horaadka iyo iskoolka, wakhtiga firaaqada iyo hiwaayadaha.

III

In la garowsado qiimaha nawaaxiga dijitaalka ah saamaynta ay ku leeyihiin xidhiidhka ilmuhu uu la leeyahay dadka qaraabadiisa ah ee u dhoow iyo qayrkii iyo in la xoojiyo xirfadaha wadadhaqanka xataa marka la isticmaalayo isgaadhsiinta elegtrooniga ah.

# Xilliyada firaaqada ee carruurta iyo hiwaayadaha

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay wakhti firaaqo oo amni ah, ciyaar iyo joogitaan aanan degdegdisyo lahayn. Xuquuqdani waxaay ku suuroobi kartaa siyaabo badan iyada oo guriga la joogo iyo iyada oo nawaaxiyada kale ee ilmuhu uu tago la joogaba. Qaadashada wakhtiga firaaqada iyo waxqabadka hiwaayaduhu muhiim ayaay u yihiin xidhiidhada uu ilmuhu qayrkii la yeelanayo iyo ka hor taga takoorkaba. Waxqabadka hiwaayadaha ilmuhu wuxuu noloshiisa ugu helayaa dad waawayn oo kale oo dareemi kara waxyaabaha ilmaha welwelka ku hayn kara. Hiwaayaduhu waxaay kobcinayaan ilmaha xirfadihiisa iyo aqoontiisa isaga oo lagu suuro galinayo caadooyinkiisa ama rajadiisa. Habnololeedka firfircoonaanta iyo nololwanaaga baaxadda leh shardiyadooda waxaa lagu kaalmeyn karaa hiwaayadaha iyo wakhtiga firaaqada ka sokow barbaarin-horaada iskoolaada iyo machadyada iyaga oo qayb ka ah shaqada barbaarinta.

Bulshooyinka wakhtiga firaaqada iyo hiwaayaduhu waxaay dhankooda ka kaalmeyn karaan ka qaybgalka mushtamaca.

Waxqabadka hiwaayadaha ee Finland waa mid aad u kala socda, carruurtuna hiwaayadaha aad bay u tagaan. In hiwaayaduhu aay noqdaan kuwo in badan natiijo raadis ah waxaay daciifin karaan in hiwaayaduhu aay noqdaan kuwo kolba carruurta si ku haboon loo suuro galiyo ilmahana wuxuu ku keeni karaa culeysyo. Arinkaas ahmiyad gaar ah waa in la siiyaa siiba marka uu ilmuhu isaga oo da' yar ah bilaabayo ciyaaraha iyo hiwaayadaha tartanka leh. Ilmaha qaar badan oo ka mid ah waxaay joojiyaan hiwaayadaha aay ku jiraan 12-15 sano markaay yihiin. Dhinac ahaan arinkaasi waa mid laga hortagi karo haddii ka qaybgalka carruurta la xoojiyo oo inta imika in ka badan ay fursad u helaan inaay sheegtaan baahiyadahooda iyo waxyaabaha aay rajaynayaan marka aay da'ahaas ku jiraan, iyo haddii qaabanqaabiyeyaasha hiwaayaduhu aay aqoon inta imika ka badan aay u yeelan lahaayeen isbaddalada jidhka iyo dareenka ilmaha. In hiwaayado dhowr ah mar lagu wada jiraa xataa waxaay xal u noqon kartaa in uu ilmuhu gabi ahaanba joojiyo hiwaayadaha marka uu da'da qaangaadhka yahay iyo in uu awoodihiisa gaarka ah helo.

Fursadaha hiwaayaduhu waxaay ku kala duwanyihiin tusaale ahaan meesha la degganyahay, qoyska dhaqaalahooda iyo asxaabtooda, mana haystaan carruurta oo dhan fursado aay hiwaayado amni ah ku helaan iyo inaay wakhtigooda firaaqada ah qaataan.

Hiwaayadaha carruurta ee Finland waxaay u kala qaybsanyihiin heerka bulsho iyo heerka dhaqaale ee dadka, taasina waxaay keentaa kala sarayn dhanka nololwanaaga iyo caafimaadka ah oo qofka daba soconaysa ilaa muddo

dheer oo marka uu qof wayn noqdo ah. Hiwaayadaha oo dhan ma aha kuwo qaali ah, laakiin dhaqaalaha hooseeya ee qoyska ayaa sii yarayn kara fursadaha uu ilmuhu u leeyahay in uu galo hiwaayad isagu waxyaabaha uu jeclaysanayo ku haboon iyo xoojinta xidhiidhada qayrkii ee wakhtiga firaaqada ah. Xaalada dhaqaale iyo ta bulsho ee qoysku waxaay sidoo kale saameyn ku leedahay helidda hiwaayadaha hiddaha iyo dhaqanka.
Isla markaas waxaa macquul ah in tagida hiwaayaduhu aay qoysaska qaar badan oo ka mid ah aay aad ugu adagtahay amaba aanay suuro gali ahaynba. In hiwaayadaha laga dhigo wax iskoolka ka dhaca ama iskoolka agtiisa ka dhaca arrinkaas ayaay si muuqata u fududeynayaan.

Xuquuqda ilmaha ee ciyaarta iyo wakhtiga firaaqada ah waxaa lagu xoojiyay heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada midoobay qodobkiisa 31, kaas oo dhigaya dowladaha heshiisku uu ka dhaxeeyo inaay tahay inaay garowsadaan xuquuqda ilmaha ee nasiimada, wakhtiga firaaqada, si ku haboon da'diisa in uu ciyaaro, waxqabadka dib u soo celinta qofka iyo ka qaybgalka nolosha hiddaha iyo dhaqanka ah ee uu qofku xor u yahay.

## Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay wakhti firaaqo oo amni ah, ciyaar iyo joogitaan aanan degdegdisyo lahayn.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Waxaa la kobcinayaa u diyaargarowga qaadashada wakhtiga firaaqada ah ee carruurta dadka ka shaqeeya inaay taageeraan hirgalinta xuquuqda carruurta iyo kobcinta wadashaqaynta wanaagsan. Waxaa la kordhinayaa aqoonta waxbarista iyo barbaarinta ee ku saabsan marxaladaha koriinka carruurta iyo isbadaladda dareenka iyo jidhka ee wakhtiga qaangaadhka ah ee dadka ka shaqeeya hiwaayadaha.

Waxqabadyada wakhtiga firaaqada iyo hiwaayadaha waa in si ka badan sida imika fiirada lagu darsadaa ilmaha dantiisu inaay aasaas u tahay waxqabadka. Ka ilaali in hiwaayadu aanay ahayn oo kaliyata wax natiijo lagu raadinayo oo tartanka xooga la saarayo, hana saarin ilmaha codsiyo culus iyo culays hana ka filin wabadan. An sugno fursadaha carruurtu aay u leeyihiin hiwaayadaha wakhtiga dheer.

# III

Waxaa la kordhinayaa nololwanaaga carruurta iyada oo la hubinayo in uu ilmo kastaa leeyahay hiwaayad uu xiisaynayo iyo waxqabad wakhtiga firaaqada ah oo xiiso badan oo noocyo duwan. Waxaa la siyaadinayaa sinnaanta carruurta hiwaayadaha siyaadinaya ee lacag la'aanta ah ee wakhtiga iskoolka lagu jiro la suuro galin karo. Taas waxaa lagu suuro galinayaa in carruurta oo dhan aay jaanis u haystaan hiwaayado kala duwan. In la garowsado tarbiyadda firfircoonida iyo ta hiddaha iyo dhaqanka muhiimadda aay leeyihiin iyo sidoo kale saamaynta shaqada mutadawacnimada iyo kooxuhu aay ku leeyihiin nololmaalmeedka ilmaha iyo garabsiinta koriinkiisa.

# IV

Waxaa la kobcinayaa waxqabadyada lagu sugayo carruurta xamilaaddooda, nasiimadooda ku filan iyo wakhtiga firaaqada.

# Carruurta oo ka qayb qaadanaya mushtamaca



Inkastoo 18 sano qofka ka yar da'diisa oo yar darteed uunan u lahayn xuquuq siyaasadeed oo buuxa, haddana waa xubno la siman dadka kale oo muhiim u ah mushtamaca.



# Qiimeynta saameynta carruurta lagu yeesho iyo u dajinta miisaaniyada carruurta

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

Hirgalidda xuquuqda carruurtu waa kuwo kolba xaaladda ku xidhan oo kala daadsan haddii saameynta carruurta lagu leeyahay qiimeyntooda aanan laga dhigin mid habraac leh oo xeerar ku salaysan wakhtiga go'aan qaadashada siyaasadda iyo qaybinta khayraadka. Xaaladda imika lagu jiro qiimeynta saameynta baaxadeedu way isbadbadashaa waxaayna ku kala duwantahay kolba go'aanka la qaadanayaa saamaynta uu carruurta ku leeyahay in uu mis si toos ah u saamaynaya yahay iyo in kale. Sida caadiga ah waxaa dhici karta in qiimeynta saameyntu uu noqdo mid yar, inkstoo go'aan qaadashadaasi ama waxqabadkaasi uu saameyn weyn ku leeyahay darajada nolosha carruurta.

Finland inaay ka jirto dowlad dagmeedyo adag waxaa aay macnaheedu tahay in carruura degmooyinka kala

duwan ku nool xaaladooda nololeed aay kala duwanaan karto. Degmooyin badan waxaa la isticmaalaaa waxqabadyo wanaagsan oo si gaar ah ugu saabsan qiimeynta saamaynta carruurta iyo horumarinta nololwanaaga ee wakhtiga go'aan qaadashada. Waxqabadyada wanaagsan si looga mideeyo waddanka oo dhan waxaa loo baahanyahay qalabyo bdheeraad ah.

Inkastoo qiimeynta saameynta dadka la horumariyay wakhtiga go'aanqaadashada iyo waxqabadka, saameynta uu arrin carruurta ku leeyahay si nidaamsan oo baaad leh looma qiimeeyo. Qaybta ay carruurtu misaaniyadaha kaga jiraan marmar iyo dhif uun baa la qiimeeyaa. Finland waxaa laga shaqeeyay in la horumariyo tilmaameyaasha lagu ogaado nololwanaaga, laakiin aqoonta go'aan qaadashada gabaabsi ayaa ka jira marka waliba laga eegayo dhanka sinnaanta. God daloolada aqoon urursiga nololwanaaga carruurta iyo aqoonta tukhasuska kala duwan leh iyo ka faa'idaysiga xaalada imika god daloolada ka jiraa waxaay daciifinayaan saameynta go'aanqaadashada ujeedada leh ee carruurta khuseeya.

Heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay qodobkiisa 3 wuxuu dhigayaa in dhammaan go'aamada carruurta khuseeya ee waxqabadka dowladda ku shaqada leh in aay tahay in marka ugu horeysa danta ilmaha fiiro gaar ah loogu yeesho. Qiimeynta saameynada carruurta iyo u dajinta miisaniyada ee arrimaha carruurta khuseeya waa qalab shaqo oo muhiim u ah hubinta danaha carruurtu inaay ahmiyadda koowaad leeyihiin iyo in lala socdo hirgalidda waajibaadka xuquuqda asaasiga ah iyo ta insaanka ee FInland.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Saamaynta aay go'aanqaadashadu ku leedahay carruurta iyo qoysaska waxaa si nidaamsan looga qaybgaliyo go'aan qaadashada iyo waxqabadka dowladeed ee darajooyinka dowladda oo dhan ah, waxaana lagu taageerayaa isticmaalka iyo hirgalinta qiimeynta saameynta carruurta. Arrinkaasi wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay degmooyinka. Waxyaabaha ku gudajira qiimeynada saameynta iyo macnahooda waxaa lagu kala soocayaa sababaynta go'aamada. Qiimeynta saameynta waxaa sidoo kale la gaadhsiinayaa go'aanada qiyaasta maaliyadda diyaarintooda iyo la socodkooda.

II

Qiimeynta saameynta carruurta iyo nidaamyada khuseeya dajinta maaliyadda carruurta waxaa si baaxad leh loo horumarinayaa xataa marka aay dowladuhu isbadalaan.

III

Aqoonta carruurta ku saabsan waxaa loo soo ururinayaa si nidaamsan waxaana isla markaas la garowsanayaa god daloolada ururinta xogta, waana la buuxinayaa god dalooladaas. Si nidaamsan ayaa loo horumarinayaa isticmaalka iyo qeexida xogta la soo ururiyay. Waxaa xogtaas loogaga faa'idaysanayaa go'aanqaadashada iyo waxqabadka.

# Xuquuqda carruurta ee ah iyo in aay xog helaan

## XAALADDA IMIKA IYO AASAASKA XUQUUQUL INSAANKA

Xuquuqda ilmaha ee ka qaybgalku waa mid muhiim ah oo xuquuqda asaasiga ah iyo kuwa aadanaha ku jirta. Inkastoo 18 sano qofka ka yar da'diisa oo yar darteed uunan u lahayn xuquuq siyaasadeed oo buuxa, haddana waa xubno la siman dadka kale oo muhiim u ah mushtamaca. Ka qaybgalka carruurta iyo ariinka kaas lagu kabayo ee ah tarbiyadda dimuqradiyadda iyo xuquuqul insaanka waxaayna muhiim u yihiin koriinka ilmaha ee uu ku noqonayo xubin firfircoon oo si buuxda bulshada uga qaybqaata.

Fursadaha carruurta ee aay kaga qaybqaadanayaan, lagu maqlayo, xog aay ku helayaan oo aay si firfircoon oo aqoon leh ula falgalayaan mushtamaca waa in si buuxda oo

da'dooda ku habboon loogu garabsiiyaa. Imika ka qaybgalka carruurta iyo in la maqlaaba waa wax kala daadsan oo aanan go'aan qaadashada oo dhan lagu suuro galinin. Dhibaatada kale ee jirtaa waxaa weeyaan in carruurta qaar ka mid ah si soo noqnoqota loo maqli waayo looguna soo jeedsan waayo. Ka qaybqaadashada oo si kala dhantaalan u hirgashaa waxaay keeni kartaa in carruurta qaarkood ka takoornaanta mushtamacu uu ay ku ururto taasin waxaay daciifinaysaa go'aanqaadahsaha mushtamaca iyo adkayntta waxqabadka.

Heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay qodobkiisa 12(1) wuxuu dhigayaa in dowladaha heshiiska ku jiraa aay sugayaan in ilmaha awoodi kara in uu aragti yeesho oo uu aragti sheegto, in uu xaq u leeyahay in uu ra'yigiisa ka dhiibto go'aan qaadashada arimaha carruurta ku saabsan. Aragtida ilmaha waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa iyada oo lagu salaynayo da'diisa iyo garaadkiisa. Sharciga aasaasiga ah qodobkiisa 6.3 § waxaa lagu amrayaa in carruurta aay tahay si siman in loola dhaqmo iyaga oo shaqsiyaad ah oo loo suuro galiyo inaay saamayn ku yeeshaan arrimaha iyaga khuseeya iyada oo garaadkooda lagu salaynayao. Xuquuqda ilmaha ee ku saabsan in la maqlo iyo in uu xog helo waxaa kaloo lagu sugay heshiisyada kale ee xuquuqul insaanka ah sida heshiiska guud ee Qaramada Midoobay ee ku saabsan dadka lixaadka la' shuurada Yurub heshiiska dadka laga tirada yaryahay aay ka gaadhay.

# HABRAACYADA ISTARAATIJIYADEED

I

Ka qaybgalka carruurta, xuquuqdooda ah in la maqlo iyo in aay xoghelaan iyaga oo si nidaamsan fiiro gaar ah ayaa loogu yeelanayaa si toos ah ama si aanan toos ahayn wakhtiga go'aanqaadashada iyo waxqabadka. Aragtiyada carruurta iyo macnahooda waxaa la kala soocayaa wakhtiga sabaynta go'aanka.

II

Waxaa la hubinayaa in carruurta dadka waawayn ee la shaqeeya aay fahan ku filan iyo aqoon ku filan aay ka haystaan taageeridda ka qaybgalka iyo waxqabsashada ilmaha.

III

Ka qaybgalka ilmaha, xuquuqdiisa ah in la maqlo iyo xog helidiisa waxaa lagu sii wanaajinayaa wadashaqaynta maamulada ka dhaxeysa iyada oo la xoojinayo qaabdhaqanada wanaagsan oo lagu dabaqayo nidaamyada dowladda iyo nolosha carruurta. Wadashaqaynta waxaa fiiro gaar ah loogu yeelanayaa carruurta aragtiyadooda aanan imika aad loogu fiirsanin.

# Hirgalinta istrateejiyada

Waxyaabaha ku guda jira istratejiyada caruurtu waxaa ay khuseeyaan dhamaan nolosha mushtamaca.



# Istaratejiyada iyo qorshaha hirgalinta

Shaqada istrateejiyada ku sal leh waa in aay noqotaa mid aragti dheer oo saameynteedu ay baaxad leedahay. Istaratejiyada carruurta ee waddanka in la hirgaliyo waxaay ku xidhantahay in lagu taxo go'aanqaadashada iyo nidaamyada waxqabad ee jira. Istaratejiyadu waa in si dabiici ah aay uga qaybgashaa ugu horayn dowladda, dowlad degmooyinka iyo degmooyinka waxqabadkooda. Waxyaabaha ku guda jira istratejiyada carruurtu waxaa ay khuseeyaan dhamaan nolosha mushtamaca waana in hirgalinteeda fiiro loogu yeesho haa'yadaha kala duwan ee waxqabta.

Istratejiyada carruurta ee waddanka waxaa loogu talo galay in lagu hago shaqada wareegyada xukuumadaha ee qoridda qorshaha hirgalinta. Qorshaha hirgalinta waxaa la diyaarinayaa iyada oo ah shaqo dowladeed oo baaxad leh waxaana lagu aqbalayaa fadhiga guud ee dowladda. Qorshaha hirgalinta waxaa si faahfaahsan loogu cayimayaa waxqabadyada la rabo in xukuumadaha kala duwan horumariyaan. Istaratejiyada carruurta ee dowladda waa in lagu kaba xukuumad kasta oo cusub qorshaha hirgalinta ee aay dajiso. Sidoo kale wadashaqaynta barlamanka iyo sarkaalada dowladda ka dhaxeeya waa in la xoojiyaa shaqadana la isku hagaajiyaa iyada oo aay ka wada shaqaynayaan khubaro kala duwan oo mushtamaca qaybihiisa kala duwan matalaya.

Istaratejiyada carruurta qorshaha lagu hirgalinayo qoridiisa, hirgalintiisa iyo la socodkiisa waa in lagu taxaa tilmaameyaasha si feejignaan leh loo xushay ee lagula socon karo habraacyada istaratejiyada lagu dejistay iyo horeusocodka hirgelinta. Hirgalintu inaay suurowdo waa in si

joogto ah loola socdaa waana in xukuumadaha hirgalinta aay sameeyeen saameynta aay yeesheen la cadeeyaa.

Hirgalinta istratejiyadu waa in aay ku sal lahaataa xog ku filan iyo xuquuqda carruurta hirgalintooda oo la hiigsanayo iyada oo lagu fulinayo xaaladaha isbadbadalaya. Komishinka xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobay waxaay si dheeraad ah u xoojiyeen xog ururinta nidaamsan iyo qiimeynta saameynta carruurta iyo dajjinta miisaaniyaddu macnaha aay leeyihiin iyo sidoo kale barnaamishka waxqabadka isku duwiddiisa. Waxyaabahaasi waa qaybo muhiim u ah istaratejiyada carruurta iyo hirgalinteeda. Isla markaas waa in la sameeyaa qaabab istratejiyada carruurtu aay sida ugu habboon ugu kabi karto hirgalinta heshiisyada Finland aay mas'uuliyaddu ka saarantahay wakhtiga bixinta warbixinta ee muddada cayiman.

In istratejiyada loo hirgaliyo si saameyn leh waxaay u baahantahay khayraad iyo aqoon. Hirgalintu waa in aay noqotaa mid xukuumadaha u dhaxeyso waana in laga qaybgaliyaa haa'yadaha iyo khubarada mushtamaca ee kala duwan, ururada iyo dad iyo carruur da'ahoodu kala duwanyihiin oo mushatamaca ka tirsan.

Hirgalinta saameynta leh waxaa ku xidhan nidaamyo la dajjiyay iyo shaqada istratejiyada oo si adag looga qaybgaliyay xukuumadda dowladda, dowlad degmooyinka iyo degmooyinka qorsheyntooda iyo go'aan qaadashadooda istratejiyadeysan. Marka la horumarinayo nidaamyada waa in shaqada aay ku jiraan shaqaale horumarinaya xuquuqda carruurta sida wakiilka arrimaha carruurta iyo shaqaalaha sharciga ee barlamaanka.

Publication design:
Anni Tolvanen / Ellun Kanat

Illustrations:
Veera Kesänen / Ellun Kanat

Typefaces:
Atkinson Hyperlegible Regular & Bold

ISBN 978-952-00-9875-9 (pdf)
ISBN 978-952-00-9871-1 (painettu)